

Dhabar xanuunka Caamka ah (Somali translation)

Bukaanjiif badan ayaa leh dhabar xanuun, lug xanuun iyo tabardarro. Calaamadahaasi waxay kugu noqon karaan kuwo murugo badan, hase yeeshee ma aha inaad u baahan tahay daryeel caafimaad oo degdeg ah. **Cauda Equina Syndrome (Koodha Ekwina Sindharowm)** waa cudur dhif ah oo halis ah. Waxay u keeni kartaa dhaawac joogto ah ama naafonimo waxaana loo baahan yahay in lagu arko kooxda lafdhabarka takhasuska degdega ah. Arag dhinaca kale ee kaarka calaamadaha digniinta ee cudurka cauda equina syndrome.





Calaamadaha digniinta ah ee dhabar xanuunka cauda equine

- Dareenka oo luma / kubuubyo inta u dhexeysa bowdahaaga ama xubnaha taranka
- Kabuubis gudaha ama hareeraha dabada ama futada
- Dareenka isbedela markaad isticmaasho waraaqda musqusha ama aad is-masaxdid
- Dhibaataada oo korodha marka aad isku daydo inaad kaadisiid
- Dhibaataada oo korodha marka aad isku daydo inaad joojiso ama aad xakameyso socodka kaadidaada
- Dareenka oo luma markaad kaadinaysid
- Di'itaanka kaadida ama u baahasho dhow oo baahatid isticmaalka xafaayadda
- Garanwaa aad garanweydid marka kaadiheystu ay buuxdo ama madhan tahay
- Awood la'aanta joojinta dhaqdhaqaaqa mindhicirka ama di'itaan
- Dareenka oo luma marka aad sii daysid dhaqdhaqaaqa mindhicirka
- Isbeddel ku yimaad awoodda lagu gaadhi karo kacsii ama shahwo-bax
- Dareenka oo luma xubnaha taranka waqtiga galmada

**Haddaad isku aragto
calaamadahan raadso caawimo
sida ugu dhakhsaha badan**